# JAMHUURIYADDA SOMALILAND
## GOLAHA WAKIILADDA







# WARBIXINTA SHIRGUDOONKA EE KAL-FADHIGA 12AAD

**26 July - 24 September 2025**

**Golaha Wakiilada JSL**
Somaliland House of
Representatives **(Lower Chamber)**

# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Golaha Wakiilladda

**WARBIXINTA**

**Shir-gudoonka ee Wax-qabadkii kal-fadhigii 12aad**

**27 July illaa 27 September 2025**

# TUSMADA WARBIXINTA


HORDHAC ........ 3

WAX-QABADKA KAL-FADHGII 12AAD ........ 5

- WARBIXINADII GOLEWAYNAHA LAGA HOR JEEDIYAY KAL-FADHIGII 12AAD ........ 5
- WAXYAABIHII GOLUHU KA DOODDAY ........ 6
- XEERARKA GOLUHU ANSIXIYAY ........ 6
- XEERARKA DHAQANGALAY ........ 6
- MASUULIYIINTII QARAN EE XILALKOODA GOLUHU ANSIXIYAY ........ 6
- MOOSHINADII GOLAHA LA HORKEENAY ........ 7

MASHAARIICDA SHARCI (XEERAR) EE GOLAHA HORYAALA ........ 8

GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY ........ 9

WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA 2024KII ........ 11

- Gudidda Joogtada iyo Anshaxa ........ 11
- Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta ........ 13
- Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka ........ 13
- Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka ........ 13
- Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ........ 14
- Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska. ........ 14
- Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada ........ 15
- Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca ........ 15
- Gudidda Arrimaha Bulshada ........ 16
- Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga ........ 16

QARAARKII GOLAHA EE XAALADA GOBOLADA BARIGA IYO FARAGALINTA DAWLADA MUQDISHO KA WADO ........ 18

DOORKII UU KA QAATAY ABAARAHA GOLAHA WAKIILLADU ........ 20

HOOLKA FADHIYADA GOLAHA OO DIB U HABAYN LAGU SAMEEYAY. ........ 20

Hay'adda Max Plank Foundation oo Golaha Buugaag ku wareejisay ........ 21

XAFIISKA LA-TALINTA ARRIMAHA HAWEENKA OO LA DAAH-FURAY ........ 22

AQOON-KORODHSIYADII IYO TABABARADII ........ 22

MAALINTA LA-KULANKA DADWAYNAHA EE GOLAHA WAKIILLADA ........ 25

SAFARADII DIBADA LOO BAXAY ........ 27

KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH ........ 36

# ARRAAR

*Mudanayaal.*

*Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan kal-fadhigan 13aad ee iminka aynu galnay isla markaana aynu u dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhiyadii hore oo aanu Goluhu Shaqooyin badan qaban, isla markaana ajandaha kal-fadhigii hore aynaan dhamaystirin.*

*Hadaba, si aynu u gudano Waajibaadkeena iyo hawlaha faraha badan ee inoo qorshaysan kal-fadhigan, waxaan halkan idiinku soo gudbinaynaa wax-qabadka kal-fadhigii 12aad ee Golaha iyo wixii kale ee hawlo ah ama dhacdooyin ahaa ee mudaddii fasaxa ee ka dambeysay kal-fadhiyadaas.*

*Kal-fadhigii 12aad* ***wuxuu ahaa kal-fadhigii Xeerarka ugu badan Goluhu ansixiyay kuwaas oo ahaa 7 Xeer*** *oo hada qaarkood dhaqangaleen, sidoo kale wuxuu kal-fadhigii ugu fadhiayda badnaa intii ka dameysay kal-fadhigii 1aad. Sidaa darteed, Mudanayaal waxa muhiim ah in kal-fadhigan 13aad ee hada furmay uu noqdo mid inay shaqadu ka sii korodho mooye aanay hoos uga dhicin kal-fadhigii ka horeeyay.*

## HORDHAC

Xeer-dejinta dalku waxay ka mid tahay Saddexda tiir ee Qaranku ku qotomo, sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas oo kala ah Xukuumada (Excutive), Garsoorka (Judiciary) iyo Xeer-dejinta (Legislation). Golaha wakiilladu waa mid ka mida ah labada aqal ee Baarlamaanka Somaliland ka kooban yahay, kuwaas oo kala ah (Guurtida iyo Golaha Wakiillada) oo marka la isku darro loogu yeedho Xeer-dejin ama Baarlamaan. Golahan Wakiillada ee la soo doortay 31 May 2021 waa Golihii labaad ee ku yimaada qaab doorasho toos ah, waana Golihii 5aad (afraad) oo ay ka horeeyeen afar gole, saddexda gole ee kale waxay ku yimaadeen hab-beeleed (xulasho). Afartaas Gole ee Golahan ka horeeyay waxay kala ahaayeen: -

- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay shirweynihii Burco **1991 - 1993** kana koobnaa **(111)** xubnood.
- Golihii Wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Boorama **1993-1997** kana koobnaa **(75)** xubnood.
- Golihii wakiillada ee lagu soo doortay Shir-weynihii Beelaha Hargeysa **1997-2005** kana koobnaa **(82)** xubnood.
- Golihii wakiilada ugu horeeyay shacabku si toos ah u soo doorto September 2005kii, **2005-2021** kana koobnaa **(82)** xubnood.

Golaha Wakiillada waajibaadkooda, tilmaamtooda Guud iyo Awoodoodu waa Xubno ka wakiil ah dadweynaha, waana qeybta 1aad ee Xeer-dejinta iyo ogolaanshaha iyo Illaalinta Siyaasada Guud ee dalka lagu hagayo iyo sidoo kale ansixinta heshiisyada dawliga ah ee ay ka mid yihiin kuwa siyaasadeed, dhaqaale iyo nabadgelyo ama kuwa keenaya culays maaliyadeed oo cusub oo aan ku soo aroorin miisaaniyadda, ama keenaya soo saarid ama wax-ka beddelid qaanuun iyo sidoo kale Ansixinta Wixii Maaliyad khuseeya oo ka mid yihiin ansixinta Miisaaniyada, Ogolaanshaha Cashuuraha, Assaasida Keydka Dhakhliga Somaliland, Daabacada Lacagta iyo habeynta nidaamyada dhaqaale iyo kuwa lacageed, Sida ku cad Qodobka 39aad, Qodobka 53aad, Qodobka 54aad iyo Qodobka 55aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Qaab-dhismeed-ka guud ee uu Golaha Wakiiladu leeyahay waxa u dheer inuu leeyahay Guddiyo u kala xilsaaran hawlo iyo shaqooyin kala duwan, waxanay ka kooban yihiin 10 Guddi Sida ku cad Xeer-hoosaadka Golaha Xeer Lr. 01/2021. Goluhu wuxuu yeeshay kal-fadhigii 12aad mudaddii u dhexaysay **26 July 2025 illaa 27 September 2025** oo fasax laba bilood ahi u dhexeeyay. Hadaba warbixintan waxaynu ku soo koobaynaa Wax-qabadkii Golaha ee kal-fadhiyadii 10aad iyo 11aad iyo mudaddii fasaxa ee ka dambeysay wixii uu qabtay.

## WAX-QABADKA KAL-FADHGII 12AAD

***Wax-qabadkA Kal-fadhigii 12aad ee Golaha Wakiillada***

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Fadhiyadii Golaweynaha ee *Kal-fadhigii 12aad* | 24 Fadhi |
| 2. | Kulamadii Gudiyada Golaha Wakiiladu yeesheeyn | 22 Kulan |
| 3. | *Isugaynta Fadhiyada iyo Kulamadii Gudiyada* | *46 Fadhi/kulan* |

## WARBIXINADII GOLEWAYNAHA LAGA HOR JEEDIYAY KAL-FADHIGII 12AAD

Waxa Labadii Kal-fadhigii 12aad Golaha laga horjeediyay 12 Warbixinood oo isugu jiray Warbiixnada Gudiyada, Warbixinada Xeerarka, Mooshino, Miisaaniyado, Xisaab Xidho iyo kuwa Masuuliyiin Qaran ay Golaha ka jeediyeen. Shaxdan hoose waxay muujinaysaa Nooca Warbixinta Golaha laga jeediyay, taariikhda la jeediyay iyo cidda jeedisay.

| Taariikhda | Nooca Warbixinta | Cidii akhridey |
|---|---|---|
| **29 July 2025** | Warbixint Gudidda Joogta iyo Anshaxa ee Golaha Wakiillada JSL | Md. Cabdikariim Adam Cumar Gudoomiyaha Gudidda |
| **29 July 2025** | Warbixint Xaalada Abaareed ee Gobolada Awdal iyo Selel | Md. Cali Xaamud Jibriil Gud. Ku-xigeenka 2aad ee Golaha |
| **11 August 2025** | Warbixinta Wasaarada Arrimaha Dibada ee Xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadeed | Md. C/raxman Aadam Bakaal Wasiirka W. Arr. Dibada |
| **12 August 2025** | Warbixinta Wasaarada Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha ee Xeerka Warshadaha iyo Wax ka badelka Xeerka Maalgashiga | Md. Siciid Maxamuud Buraale Wasiirka W. Maalgashiga |
| **16 August 2025** | Warbixinta Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Warshadaha ee Wax ka badelka Xeerka Tamarta Korontada | Md. Md. Eng Ahmed Jaamac Wasiirka W. Maalgashiga |
| **16 August 2025** | Warbixinta Gudidda Shareecada iyo Qoyska ee Xeerka Rahanka Bangiyada | Md. Barkhad Jaamac Batuun Gudoomiyaha Gudidda |
| **14 September 2025** | Warbixinta Gudidda Arrimaha Gudaha ee Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Booliiska Somaliland | Md. Maxamed Jaamac (Koodbuur) |
| **20 September 2025** | Warbixinta Gudidda Gaarka ah (Ad hoc Committee) ee loo saaray Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Muumulka Maalyada Xeer Lr. 75/2025 | Md. Maxamed Xasan Siciid Gudoomiyaha Gudidda gaarka ah |
| **21 September 2025** | Warbixinta Hantidhawraha Guud ee Xisaab Xidhka Sannadkii 2023kii | Md. Muuse Yuusuf Idigaa Hantidhawraha Guud ee Qaranka |

| | | |
|---|---|---|
| **23 September 2025** | Warbixinta Gudidda Gaarka ah (Ad hoc Committee) ee loo saaray Xeerka Rahanka Bangiyada | Md. Siciid Maxamed Ismaciil Gudoomiyaha Gudidda gaarka ah |
| **23 September 2025** | Warbixinta Hantidhawraha Guud ee Xisaab Xidhka Sannadkii 2025kii | Md. Muuse Yuusuf Idigaa Hantidhawraha Guud ee Qaranka |

## WAXYAABIHII GOLUHU KA DOODDAY

| N | Mawduuca Doodda | Taariikhd |
|---|---|---|
| 1. | Xaalada Abaaraha Dalka | 29 July 2025 |
| 2. | Faragalinta Dawlada Muqdisho ee Somaliland gaar ahaan Gobolka Sool | 03-04 August 2025 |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Kala Xadaynta Xukuumada Xeer Lr. 71/2025 | 09 August 2025 |
| 4. | Xeerka Rahanka Bangiyada dooda akhriska labaad | 17 August 2025 |
| 5. | Wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Booliiska Somaliland | 22 September 2025 |

[

## XEERARKA GOLUHU ANSIXIYAY

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda | U gudbay |
|---|---|---|---|
| 6. | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Bariga | 02/08/2025 | Madaxweynaha |
| 7. | Xeerka Kala-xadaynnta Nidaamka Xukuumada iyo H. Madaxabanaan | 30/08/2025 | Madaxwaynaha |
| 8. | Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha | 01/09/2025 | Madaxweynaha |
| 9. | Xeerka Maamulka Maaliyada | 21/09/2025 | Madaxweynaha |
| 10. | Xeerka Rahanka Bangiyada | 23/09/2025 | Golaha Guurtida |
| 11. | Wax ka badelka Xeerka Booliiska | 27/09/2026 | Golaha Guurtida |

## XEERARKA DHAQANGALAY

| No | Mashruuc Sharciga la Ansixiyay | Taariikhda Dhaqangalka |
|---|---|---|
| **1.** | Xeerka Kala-xadaynnta Nidaamka Xukuumada iyo Hay'addaha Madaxabanaan | 17/09/2025 |
| **2.** | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Bariga | 21/09/2025 |
| **3.** | Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha | 05/10/2025 |

## MASUULIYIINTII QARAN EE XILALKOODA GOLUHU ANSIXIYAY

| N | Magaca Masuulka | Xilka | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | Mr. Cabdirisaaq Maxamed Siciid | Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka | 02 August 2025 |
| 2. | Mr. Cabdi Axmad Aayar | Gudoomiyagha Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3. | Ibraahim Ducaale Cawke | Gud. Ku-xigeenka Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 4. | Yuusuf Sh. Axmad Cali | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 5. | Nadra Cali Xasan | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 6. | Cabdi Yuusuf Daahir | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 7. | Muumiin Gadiid Cumar | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 8. | Mubaarik Cabdi Xasan | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 9. | Cabdirashiid Siciid Cindi | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 10. | Mustafe Maxamed Yoonis | Xubin Gudidda Qandaraasyada | 02 September 2025 |
| 11. | Dr. Aadam Axmad Daahir | Gud. Komishanka Maamul Wanaaga | 02 September 2025 |
| 12. | Madar Siciid Xasan | Gud. Ku-xigeenka Maamul Wanaaga | 02 September 2025 |
| 13. | Cabdiwahaab Faarax Nuur | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga | 02 September 2025 |
| 14. | Cabdiqani Axmad Cali | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga | 02 September 2025 |
| 15. | Axmad Xirsi Ducaale | Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska | 02 September 2025 |
| 16. | Cabdirashiid Saleebaan Maxamed | Gud. Ku-xigeenka Hay'adda Caymiska | 02 September 2025 |
| 17. | Maxamed Kayse Axmad | Gud. Hay'adda Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 18. | Dr. Maxamuud Jaamac Cali | Gud. Ku-xigeenka H. Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 19. | Aniisa Cabdi Axmad | Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 20. | Cabdirashiid Maxamed Xuseen | Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 21. | Xasan Yuusuf Maxamed | Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 22. | Siciid Axmad Xasan | Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02 September 2025 |
| 23. | Aamina Maxamed Fure | Xubin Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 02 September 2025 |
| 24. | Muuse Yuusuf Cismaan (Idigaa) | Gudoomiyaha Hantidhawraha Guud | 13 September 2025 |

## MOOSHINADII GOLAHA LA HORKEENAY

| Taariikhda | Nuxurka Mooshinka | Cidda akhriday | Ansixintii |
|---|---|---|---|
| 16 August 2025 | Mooshin ku saabsan Curinta Xeerka Amniga Qaranka | Md. Axmad Nuur Guruuje | Ma Ansixin |
| 16 August 2025 | Mooshin ku saabsan sidii Golaha Wakiilladu taageero ugu muujin lahaa Madaxweynaha Dalka Maraykanka Donald Trump, Xildhibaanadii mooshinka ka keenay in la aqoonsado Jamhuuriyadda Somaliland, Saxaafada Caalamiga ah iyo Cid kasta oo taageeraysa Dadaalada loogu jiro Aqoonsi Raadinta Jamhuuriyada Somaliland | Md. Maxamed Xasan Siciid | Ansaxay |

## MASHAARIICDA SHARCI (XEERAR) EE GOLAHA HORYAALA

### B. Mashaariicda ee Gudiyaddu gacanta ku hayaan

| N | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo |
|---|---|---|
| 1. | Wax ka badelka Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Jinsiyada | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 3. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Hya'adda u diyaargarawga Aafooyinka iyo Kaydhka Raashinka | Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka |
| 4. | Xeerka Tamarta Korontada | Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka |
| 5. | Wax ka badelka Xeerka Xanaanada Xoolaha | Gudidda Deegaanka iyo Khayraadka |
| 6. | Mashruuc Sharciga Jidaynta kabka H. Gobolada Barri iyo Nidaaminta Cashuuraha Dawladda dhexe u qabato dawldaha hoose | Gudidda Dhaqaalah, M. iyo Ganacsiga |
| 7. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Wada-marita Gaadiidka | Gudidda Hawlaha Guud |
| 8. | Xeerka Amniga Technology-yada iyo Dambiyada Technology-yada Casriga ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 9. | Xeerka Illaalinta Xogta Electronics-ka ah | Gudidda Hawlaha Guud |
| 10. | Wax ka badelka Xeerka Ciqaabta Guud | Gud. Garsoorka, Cadaalada & X. Insaanka |
| 11. | Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Maalgashiga | Gudidda Arrimaha Dibada, I. C iyo M |
| 12. | Xeerka Horumarinta Warshadaha | Gudidda Arrimaha Dibada, I. C iyo M |
| 13. | Xeerka Ergooyinka Diblomaasiyadiinta | Gudidda Arrimaha Dibada, I. C iyo M |
| 14. | Xeerka Adeega Isgarabsiga Dawlada iyo Ganacsatada | Xafiiska Gudoomihaya |
| 15. | Xeerka Kaalmada Adeega Sharciga | Xafiiska Gudoomiyaha |
| 16. | Wax ka badelka iyo Kaabist Xeerka Kalluumaysiga | Xafiiska Gudoomiyaha |

### T. Xeerarka Gole Waynaha Horyaal

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Sharciga Dakhliga Shidaalka | Golewaynaha |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Maamulka Maaliyada | Golewaynaha |

### J. XeerarkaGuurtida ku maqan

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Rahanka Bangiyada | Golaha Guurtida |
| 2. | Wax ka badelka Xeerka Ciidanka Booliiska | Golaha Guurtida |
| 3. | Wax ka badelka Xeerka Kufsiga | |

## GO'AAMADII GOLUHU GAADHAY

Intii lagu jiray Kal-fadhigii 12aad Goluhu wuxuu sameeyay go'aano ansixineed oo gacan taag **34 jeer**, go'aanadaas oo uu ku ansixiyay Xeerar, masuuliyiin qaran, Mooshino, qaraaro iyo ajanadayaal.34 kaas go'aana waxay kala ahaayeen: -

| 1. | Nooca Go'aanka | Tariikhda | U gudbay |
|---|---|---|---|
| 2. | Go'aanka Ajandaha Kal-fadhiga 13aad | 27/07/2025 | Shir-gudoonka |
| 3. | Go'aankii Ansixinta Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Bariga | 02/08/2025 | Madaxweynaha |
| **4.** | Go'aankoi Ansixinta Mr. Cabdirisaaq Maxamed Siciid Xubin Komishanka Doorashooyinka Qaranka ah | 02/08/2025 | Madaxweynaha |
| **5.** | Go'aankii Anxinta Xeerka Kala-xadaynnta Nidaamka Xukuumada iyo H. Madaxabanaan | 16/08/2025 | G. Guurtidas |
| **6.** | Go'aankii Ansixinta Qaraarka Golaha ee Faragalinta Dawlada Soomaaliya ku hayso Somaliland gaar ahaan Gobolka Sool bari iyo Joojinta Wada-hadaladii Soomaaliya iyo Somaliland | 30/08/2025 | Madaxwaynaha |
| **7.** | Go'aankii Anxinta Xeerka Ciidanka Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha | 01/09/2025 | Madaxweynaha |
| **8.** | Go'aankii Anxinta Cabdi Axmad Aayar Gudoomiyaha Gudidda Qandaraasyada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **9.** | Go'aankii Anxinta Ibraahim Ducaale Cawke ku-xigeenka Gud. Gudidda Qandaraasyada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **10.** | Go'aankii Anxinta Yuusuf Sh. Axmad Cali Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **11.** | Go'aankii Anxinta Nadra Cali Xasan Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **12.** | Go'aankii Anxinta Cabdi Yuusuf Daahir Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **13.** | Go'aankii Anxinta Muumiin Gadiid Cumar Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **14.** | Go'aankii Anxinta Mubaarik Cabdi Xasan Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **15.** | Go'aankii Anxinta Cabdirashiid Siciid Cindi Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **16.** | Go'aankii Anxinta Mustafe Maxamed Yoonis Xubin Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **17.** | Go'aankii Anxinta Dr. Aadam Axmad Daahir Gudoomiyabha Komishanka Maamul Wanaaga | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **18.** | Go'aankii Anxinta Madar Siciid Xasan Gudoomiye ku-xigeenka Komishanka Maamul Wanaaga | 02/09/2025 | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **19.** | Go'aankii Anxinta Cabdiwahaab Faarax Nuur Xubin Komishanka Maamul Wanaaga | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **20.** | Go'aankii Anxinta Cabdiqani Axmad Cali Xubin Komishanka Maamul Wanaaga | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **21.** | Go'aankii Anxinta Axmad Xirsi Ducaale Gudoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **22.** | Go'aankii Anxinta Cabdirashiid Saleebaan Maxamed Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **23.** | Go'aankii Anxinta Maxamed Kayse Axmad Gudoomiyaha Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **24.** | Go'aankii Anxinta Dr. Maxamuud Jaamac Cali Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **25.** | Go'aankii Anxinta Aniisa Cabdi Axmad Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **26.** | Go'aankii Anxinta Cabdirashiid Maxamed Xuseen Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **27.** | Go'aankii Anxinta Xasan Yuusuf Maxamed Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **28.** | Go'aankii Anxinta Siciid Axmad Xasan Xubin Hay'adda Dhawrista Tayada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **29.** | Go'aankii Anxinta Aamina Maxamed Fure Xubin Gudidda Hay'adda Shaqaalaha Dawlada | 02/09/2025 | Madaxweynaha |
| **30.** | Go'aanka Ansixnta Muuse Yuusuf Cismaan (Idigaa) Hantidhawrha Guud ee Qaranka | 13/09/2025 | Madaxweynaha |
| **31.** | Go'aanka Ansixnta Xeerka Maamulka Maaliyada | 21/09/2025 | Madaxweynaha |
| **32.** | Go'aanka Ansixnta Xeerka Rahanka Bangiyada | 23/09/2025 | G. Guurtida |
| **33.** | Go'aanka Ansixnta Wax ka badelka Xeerka Booliiska | 27/09/2026 | G. Guurtida |

## WAX-QABADKA GUDDIYADA GOLAHA EE KAL-FADHIGII 12AAD

Gudiddayada Golaha Wakiiladu waxay ka kooban yihiin 10 Guddi iyo Gudidda Hawlaha Golaha ay xubno ka yihiin Shir-gudoonka, Gudoomiyayaasha 10 Gudi iyo Xoghayaha Guud, waxayna kala yihiin:-

1. **Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee)**
2. Gudidda Joogtada iyo Anshaxa.
3. Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada.
4. Gudidda Deegaanka, Kheyraadka Dabiiciga, wax soo saarka iyo Tamarta
5. Gudidda Arrimaha Bulshada
6. Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska
7. Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka.
8. Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashida Caalamiga iyo Qorshaynta iyo Maal-gashiga
9. Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgelyada iyo Difaaca
10. Gudidda Hawlaha Guud, Gaadiidka iyo Technologyada
11. Gudidda ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka.

Gudiyada Golaha wakiiladdu iyagoo Gudanaya Waajibaadkooda uu Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada siiyay, waxay qaybtaan shaqooyinka ugu mihiimsan golaha wakiilada, iyada oo gudi wal u qaabilsan shaqooyin gaar ah Golaha.

Sidaa darteed waxay Golaha uga soo war bixiyaan Ansixintooda Masuuliyiinta ay soo magacawdo Xukuumada markaa joogtaa iyo Hay'adaha Madaxa Banaan. Hadaba, iyadoo Gudi waliba Warbixineeda Golaha ka hor akhrin doonta waxaan halkan idinku soo gudbinaynaa wax qabadkoodii Gudiyada oo kooban. Hadaba, qaybtan waxaynu si kooban ugu soo gudbinaynaa Wax-qabadkii Gudi kasta ee kal-fadhigii 12aad oo kooban.

### Gudidda Hawlaha Golaha (Business Committee)

Gudidda Hawlaha Golaha ee (Business Committee) waxay yeesheen dhowr kulan oo ay ku falanqaynayayay hawlaha Golaha sida:-

- Miisaaniayda Golaha ee Sannadka 2026
- Fadhiyada Golaha
- Xeer-hoosaadka Golaha
- Isku shaandhaynta Gudiyada
- Shaqaalaha Golaha
- Iyo Xeerarka Golaha horyaal iyo Diyaarinta Ajandaha Kal-fadhiga 13aad

**07-08 September 2025** Gudidda oo kulan socday labadaas maalmood ku yeeshay Hotel Maansoor, kulankaas waxa si gaar ah loogu falanqeeyay Miisaaniyada Golaha ee Odoroska Miisaaniyada 2026ka Goluhu ku yeelanayo siu u sannadka soo socda ugu shaqeeyo, waxaana kulankaas ka soo baxay oo Gudiddu isu afgaratay Miisaaniyada Golaha iyo waxyaabahay ka koobnaan doonto.

Sidoo kale **25 iyo 29 November 2025** Gudiddu waxay yeelatay Kulamo dhawr ah oo lagu falanqaynayay arrimo muhiima oo ay ugu horeyaan Xeerarka Golaha horyaal ee la qorshaynayo in kal-fadhiyada soo socda laga shaqeeyo iyo diyaarinta Ajandaha kal-fadhiga 13[aad] oo Gudiddu soo diyaarisay, waxaana ka soo baxay in Golaha ay horyaalaan 19 Xeer oo isugu jira kuwo qabyo-qoraal cusub iyo kuwa wax ka badel iyo kaabis oo xukuumada intooda badan ka yimi. Sidoo kale waxa ka soo baxay qabyo-qoraalka ajandaha kal-fadhiga 13[aad] oo fadhiga ugu horeeya uu Goluhu ka dooddi doono.

## Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Guddida joogtada iyo Ashaxu iyada oo Gudanaysa waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 54[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, Waxa ay Guddidu kal-fadhigii 12aad ee la soo dhaafay waxa ay kulamo la yeelatay Masuuliyiin kala duwan. Hadaba wax-qabadkii Gudidda oo kooban waxa uu ahaa sidan:

### Kulamadii Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **09 November 2025** waxa ay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay la yeelatay mas'uulliyiinta Wasaaradda Harumarinta Beeraha ee Jamhuuriyadda Somaliland.
- **23 November 2025,** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Duqa Degmada ee Caasimadda Hargeysa, **Md. Cabdikariin Axmed Mooge.**

### Go'aanka Guddida ee La Xidhiidha Guddida Tacliinta Sare

**04 November 2025,** Guddida Joogata ah & Anshaxu waxay soo saartay go'aan Guddi oo sumaddiisu tahay **WG/G/18/182/2025** kaas oo ay ku laashay go'aankii Guddida Tacliinta Sare ee sumaddiisu ahayd **Ref: GTS/GUDD/01/082/Oct/2025**, kuna saabsannaa in waxbarashada heerka koowaad (undergratuate degree) lagu qalin jebiyo 4 sannaddood marka laga reebo kulliyadaha caafimaadka. Maadaama oo uu toos uga hor imanayo Qodobka 30aad, farqaddiisa 1aad, xarafkiisa (b) ee **Xeerka Waxbarashada Qaranka Xeer Lr.77/2018** oo dhigaya in muddada lagu qaadanayo shahaadada koowaad (B. A/B. Sc) ay noqonayso inta u dhaxaysa 3 ilaa 4 sannaddood.

## Gudidda Deegaanka iyo Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-sarka iyo Tamarta

Guddida Deegaanka, Kh. Dabiiciga ah, Wax soo-saarka iyo Tamartu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 58aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii labadii Kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **18 September 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta
- **27 August 2025** Gudiddu kulan la yeelatay Hay'adda Dhawrista Tayada

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **07 August 2025** waxay Gudidda Arrimaha Gudaha waxay kulan dadwayne iyo wada-tashi ah Magaalada Burco ee Gobolka Tog-dheer ugu qabatay Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Tamarta Korontada.
- **18 August 2025** waxay Gudidda Arrimaha Gudaha waxay kulan dadwayne iyo wada-tashi ah Magaalada Boorama ee Gobolka Awdal ugu qabatay Wax ka badelka iyo Kaabista Xeerka Tamarta Korontada.

## Gudidda Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka

Guddida Illaalinta iyo Daba-galka Hantida Qaranka Goluhu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 60aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **03 August 2025** Waxay Gudiddu kulan shaqo la qaadatay Masuuliyiinta Wasaarada Horumarinta Maaliyada oo horkacayo Wasiirka Maaliyada **Md. Cabdilaahi Xasan Aadam.**
- **26 August 2025** Waxay Gudiddu kulan shaqo la qaadatay Hantidhawraha Guud ee Qaranka **Md. Muuse Yuusuf Cismaan (Idigaa)**
- **30 August 2025** Waxay Gudiddu kulan shaqo la yeesheen Xubnaha Gudidda Qandaraasyada Qaranka oo uu hogaaminayo Gudoomiyaha Gudidda Qandaraasyada **Mr. Cabdo Axmad Aayar.**

## Gudidda Dastuurka, Garsoorka Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanka

Guddida Dastuurka, Garsoorka, Cadaalada iyo Xuquuqal Insaanku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 59aad ee Xeer-

hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhiga 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **05 August 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Agaasimaha Guud ee Wasaarada Cadaalada.
- **12 August 2025** Waxay Guddidu kulan Xog-waraysi la yeelatay Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawlada Md. Cabdicasiis Xirs Warsame

## Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadu iyo Ganacsiga iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 61[aad] ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Guddidi la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka 2025

- **01 September 2025** Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga waxay Kulan Xog-warran ah la yeelatay **Hay'adda Caymiska Qaranka**, taas oo uu Madaxweynaha Qaranku magacaabay, kuwaas oo kala ah **Md. Axmed Xirsi Ducaale Guddoomiyaha H. Caymiska Qaranka iyo Md. Cabdirashiid Saleebaan Maxamed Gud. ku-xigeenka H. Caymiska Qaranka)**

### Kormeeradii iyo Safarii Gudidda

- **19 November 2025** Guddida Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsi ee Golaha Wakiilada Safar shaqo ku tagtay Gobolka Awdal, waxayna kormeero iyo u kuur gal ku martay Hay,addaha kala ah:
  - Xarunta Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Gobolka Gobolka
  - Xarunta Wasaaradda Tegnoolajiyadda iyo Is-gaadhsiinta ee Gobolka Awdal
  - Xarunta Wasaaradda Cadaaladda ee Gobolka Awdal.
  - Xarunta Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Gobolka Awdal

- **20 November 2025** sidoo kale Guddida ayaa Kormeer shaqo ku tagay kastamada Abaarso, Kalabaydh iyo Wajaale si ay usoo indha indheeyaan xaalada dakhli ururinta iyo duruufaha ka jira.

## Gudidda Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoyska.

Guddida Arrimaha Shareecada, Dhaqanka iyo Qoysku iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 63[aad] ee Xeer-

hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kala-fadhi 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **11 August 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Gudidda Culimada Bangiga Somaliland kaas oo ay Gudiddu culimada kagala tashanaysay Xeerka Rahanka Bangiyada oo Gudidaas ka soo tala-bixinaysay.

## Guddida Hawlaha Guud, Gaadiidka, Guryaynta iyo Tiknooliyada

Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyadda, Guryeynta & Dhulka iyaga oo Gudanaya waajibaadkooda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 62aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **17 September 2025** Guddida Hawlaha Guud, Tiknoolajiyada, Guryeynta iyo Gaadiidka ee Golaha Wakiillada ayaa kulan la yeeshay Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Gaadiidka iyo Jidadka, **Md. Cismaan Ibraahin Nuur (Afgaab**), kaas oo lagu lafaguray wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Waddo-marista iyo Gaadiidka.

## Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca

Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyadu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 55aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii kal-fadhiga 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **29 July 2025,** Gudidda Arrimaha Guduhu waxay kulan la yeelatay **Mudane Cabdirisaaq Maxamed Siciid** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Xubin Kamida Koomishanka Doorashooyinka Qaranka**, si xilkaas ah Goluhu ugu ansixiyo.

### Masuuliyiinta Qaran ee ay Gole-waynaha uga soo talo-bixisay

- **30 July 2025,** Gudidda Arrimaha Guduhu waxay Golewaynaha u soo gudbisay **Mudane Cabdirisaaq Maxamed Siciid** oo Madaxwaynuhu usoo magacaabay **Xubin Kamida Koomishanka** si Goluhu u ansixiyo ka dib markii ay soo baadhay inuu buuxin karo booskaas sida Sharcigu dhigayo

### Xeerarka ay Golewaynaha u soo gudbisay

  - **13/Sept/2025** Waxay Guddidu Gole-waynaha usoo gudbisay Wax-kabadal iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliska XLr 63/2019.

## Gudidda Arrimaha Bulshada

Guddida Arrimaha Bulshada iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 64aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii labadii kal-fadhi ee Kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

### Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **18 November 2025** Guddida arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada ayaa kulan la yeelatay wasaarada caafimaadka oo ay wehelinayso Hay'adda caalamiga ah ee SAVE THE CHILDREN, oo ujeedkiisuna ahaa (health financing advocacy).
- **23 September 2025** Guddida arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiilada ayaa kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Warfaafinta Md. Axmedyaasin Sh. Cali Ayaanle.
- **23 September 2025** Guddida arrimaha Bulshada ee Golaha ayaa kulan la yeelatay Wasiirka Wasaarada Waxbarashada iyo Sayniska Md. Ismaaciil, kulankaas oo lagaga hadlayay xaalada Waxbarashada dalka.

### Safaradii Gudidda Arrimaha Bulshada

- **16 August 2025** wafti balaadhan oo ay hogaaminayso Guddida arrimaha bulshada ee golaha wakiilada isla markaana ay horumood ka yihiin ururada saxafiyiinta Somaliland, ujeedkuna ahaa xog-ogaal u noqoshada habka ay u shaqeeyaan warbaahinta madaxa-banaan iyo kuwa dawliga ah ee dalka kenya.

### Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **10 November 2025** Guddida Arrimaha Bulshadu waxay daah-furtey kulan la-tashi dadweynaha (Public Hearing Meeting) ku saabsan xeerka cidhib-tirka Gudniinka hablaha, kulankan oo socday muddo 3 cisho kana soo qeyb-galeen haween, culimo, masuuliyiin dawladeed, dhakhaatiir ayaa ujeedkiisu ahaa sidii afkaaro wax ku ool ah oo ku saleysan xaqiiqooyinka u heli lahaayeen si ay ugu saleeyaan xeerkaas.

- **24-25 November 2025** Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha wakiilada ayaa ka qeyb-gashay shirweynaha maal-galinta caafimaadka Somaliland oo lagaga arrinsaneyey mar hadii donors-ka kabi jirey caafimaadku dhimayaan sidii loogu heli lahaa xal miisaaniyadeed si aanay isku xidhin goobo badan oo caafimaad.

## Guddida Arr. Dibadda, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maal-gashiga

Guddida Arrimaha Dibada, I. Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maalgashigu iyadoo oo Gudanaya waajibaadkeeda Dastuuriga iyo Awoodeheeda ku xusan Qodobka 57aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada, wax-qabadkeedii Kal-fadhigii 12aad waxay kala ahaayeen sidan:-

## Kulamadii Xog-wareysi ee Gudiddu la Yeelatay Masuuliyiinta Qaranka

- **30 August 2025** Gudida Arimaha Debeda Iskaashiga Caalamiga ah Qorshaynta iyo Maalgashiga oo weheliyaan Gudida Dabagalka iyo Ilaalinta Hantada Qaranka, Gudida Khayraadka Dabiiciga ah, Deegaanka, Waxsoosaarka iyo Tamarta iyo Gudida Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga ee Golaha Wakiilada ayaa maanta kulan wada jira ah kula yeeshay xarunta golaha wakiilada Wasaaradaha kala ah Wasaarada Horumarinta Maaliyada iyo Wasaarada Maalgashiga iyo Horumarinta Warshadaha, kulan hawleedkan ayaa lagu falanqeeyay dib u- eegista-wax-ka bedelka iyo kaabista xeerka maalgashiga Somaliland
- **26 August 2025** waxay Gudiddu kulan Xogwaraysi ah la yeelatay Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibada Md. Cabdiraxmaan Daahir Aadam.

## Safaradii iyo Kormeeradii Gudiddu samaysay

- **18 October 2025** Gudidda arimaha debeda caalamiga qorshaynta iyo maalgashiga waxay Safar kormeer ah ku saabsan labada Xeer ee kala ah wax ka badelka Xeerka Maalgashiga iyo Xeerka Warshadaha oo Gudiddu gacanta ku tageeen Warshadaha ku yaala Caasimada Magaalada Hargeysa.

- **16 October 2025** Gudidda arimaha debeda caalamiga qorshaynta iyo maalgashiga waxay Safar kormeer ah ku saabsan Xeerka Warshadaha oo Gudiddu gacanta ku tageeen Warshadaha ku yaala Magaalada Berbera ee Gobolka Saaxil.

- **16 September 2025** Gudidda arimaha debeda caalamiga qorshaynta iyo maalgashiga waxay Safar kormeer ah ku saabsan wax ka bedelka xeerka maalgashiga Kutageeen Magaalada Berbera ee Gobolka Saaxil.

## Kulamadii Dadweyne (Public Hearings) ee Gudiddu qabatay

- **11 October 2025** Gudida Arrimaha, Dibeda, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maalgashigu waxay qabteen Kulan wada-tasho (Public Hearing Meeting) ku saabsan mashruucsharciga horumarinta warshadaha iyo wax ka bedelka iyo kaabista xeerka maalgashiga (xeer Lr.99/2021).

- **03 September 2025** Gudida Arrimaha, Dibeda, Iskaashiga Caalamiga ah, Qorshaynta iyo Maalgashigu Waxay qabatay kulan wada-tashi iyo gorfayn ah oo lagu falanqaynayay wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Maalgashiga ee dhowaan madaxweynaha qaranku ku soo celiyay Golaha Wakillada, isla markaana Gudiddu gacanta ku hayso.

## GUDIYADII GAAR AHAA (AD HOC COMMITTEES) EE GOLUHU SAARAY

- **Gudi gaar ah oo loo saaray Xaalada Abaaraha Dalka: -**

**29 July 2025** Waxa Shir-gudoonku Gudi gaar ah (ad hoc committee) u saaray Xaalada Abaaraha Dalka gaar ahaan Gobolada galbeedka si ay u sooo qiimayso Warbixin Golaha uga soo siiso.

- **Gudi gaar ah oo loo saaray Xeerka Rahanka Bangiyada -**

**01 September 2025** Waxa Shir-gudoonku Gudi gaar ah (ad hoc committee) u saaray Xeerka Rahanka Bangiyada oo dood Goluhu ka yeeshay laga saaray in dib loogu noqdo oo gudi gaar ah loo saaro, gudidaas oo xeerka ku soo salaynaysa waxyaabihii dooda Mudanayaasha ka soo baxay

## QARAARKII GOLAHA EE XAALADA GOBOLADA BARIGA IYO FARAGALINTA DAWLADA MUQDISHO KA WADO

**03-04 August 2025** ayuu Golaha Wakiillada dood ka yeeshay Fargalinta Dawlada Muqdisho ee Gobolada Bariga gaar ahaan Gobolka Sool, dooddaa soo socotay laba fadhi waxa ka qayb-qaatay 30 Mudane. Goluhu wuxuu qaraar go'aan gole lagu ansixiyay ka soo saaray Xaalada Gobolka Sool gaar ahaan Magaalada Laascaanood.

Go'aankaas oo Goluhu si rasmi u soo saaray Fadhigii 14aad ee Kal-fadhiga 12aad oo qabsoomay **30 August 2025**, waxayna ahaayeen go'aamadaaasi sidan:-

Golaha Wakiilladu markuu arkay Qodobka 39aad ee Dastuurka Somaliland oo u dhigan "Golaha Wakiilladu waa qayb ka wakil ah dadweynaha, waana qaybta kowaad ee Xeer-dejinta dalka, ansixinta Xeerarka, ogolaanshaha iyo ansixinta siyaasada guud ee hogaaminta dalka"

Golaha Wakiilladu isagoo gudanaya waajibaadka ku tilmaaman Qodobka 38aad Xarafkiisa (B) iyo Qodobka 53aad Farqadiisa 4aad.

Isagoo ka duulaya Soo jeedinta Mudanayaasha ee Dooddii 03-04 August 2025 ee ku saabsanayd xaalada Sool barri iyo tala-bixinta sharci ee La-talyaasha sharci ee Golaha Wakiilada.

Sidaa awgeed, Golaha Wakiilladu wuxu tallo soo jeedimahan u soo jeedinayaa Xukuumada

1. Golaha Wakiillada Somaliland waxa u soo baxday in Dawlada Soomaaliiya ee taagta daran ee ka dhisan Muqdisho ay farogalin toos ah ku hayso madax-

banaanida Jamhuuriyada Somaliland, isla markaana ay go'aansatay in ka samahyso bariga Sool xasilooni daro lid ku ah amniga iyo deganaanshaha Gobolka, taas oo xadgudub ku ah Madax-banaanida Somaliland, sidoo kale ka horimanaysa qaanuunka dawliga ah, ahdiga qaramada midoobay (UN Charter 1945) iyo ahdiga midawga Afrika EU charter 1963.

2. Goluhu fadhi xidhan ugu yeedho dhamaan Masuuliyiinta arrimaha amniga dawlada ee xaalada barigu khusayso si goluhu ula xisaabtamo waxna uga waydiiyo talaabooyinka ay ilaa hada qaadeen iyo qorshayaasha ay tahay in la qaado si looga hortago faragalinta dawlada taagta daran ee Soomaaliya.
3. In Xukuumadu gabi ahaanba joojiso wada-hadalada u dhexeeya Somaliland iyo Soomaaliya, maadaama ay faragalin ku hayso madax-banaanida qaran ee Somaliland.
4. **In Beesha Caalamka, saaxiibadeena siyaasda, ururada Gobolka iyo dhamaan wadamada caalamka** la gaadhsiiyo in Somaliland lagu soo duulay, isla markaana Dawlada Muqdisho ay faraglain qaawan, dagaal hurin iyo iska horkeen bulsho ka wada Somaliland gaar ahaan gobolada bariga ee Sool bar iyo Sanaag bari.
5. Goluhu wuxuu taageerayaa, isla markaana xukuumada u soo jeedinayaa in darargaliyo, lana xoojiyo fidintii baaqii Madaxweynaha Somaliland Md, Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro) ee uu gogoshada nabadeed u fidiyay beelaha walaalaha ah ee Gobolka Sanaag.
6. In Xukuumadu qorshe lagu xoojinayo amniga iyo maamulka degmooyinka la jaarka ah goobaha ay colaaduhu ka soo cusboonaan karto ama ay ka bilaabmi karto sida Degmada Caynaba iyo kuwa kale ee nabdoon ee Gobolka Sool, isla markaan muhiim u ah ka hortaga colaad horleh iyo difaac qaran, iyadoo degmooyinkaas la xoojinayo amnigooda iyo difaaqooda, waana dawladu u dejisaa qorshayaal lagu nidaaminayo, isla markaana qorshayaashaas lagu jaangooyaa Miisaaniyada 2026. Iyadoo isla qorshayaashaas loogu talagalayo duruufahooda baahiyeed ee ku gadaaman deegamadaas.
7. In Gudi Gole loo diro aaga demgooyinkaas si ay u soo qiimeeyaan baahiyahooda iyo wixii wax-qabad ah ee suurgal ah, iyagoo isla markaan u soo gudbinaya golaha warbixintooda xambaarsan arrimahaas.
8. Gabo-gabo, Goluhu wuxuu Xukuumada u soo jeedinayaa fulinta go'aamadii hore ee Golaha uga soo baxay ee Tixraacoodu ahaa GWKF/5961-2023 iyo kan kale ee sumadiisu ahayd GWKF/1107-2025 ee la xidhiidhay wada-hadalada Soomaaliya iyo Somaliland, Xoojinta Amniga iyo Ciidamada Qaranka iyo Madax-banaanida Xisbiyada Siyaasada. Sidoo kale, labada Gole ee Xeer-dejintu isugu yimaadaan tallo qaran si loo gorfeeyo, tallo midaysana looga yeesho arrinta Bariga Sool.

## DOORKII UU KA QAATAY ABAARAHA GOLAHA WAKIILLADU

Goluhu wuxuu Kal-fadhigii hore dood ka yeeshay Xaalada Abaaraha dalka ka soo korodhay, sidoo kale wuxuu Goluhu Warbixin ka dhagaystay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Md. Cali Xaamud Jibriil oo hogaaminayay wafti ku guurgashay Xaalada Abaareed ee gobolada galbeedka (Awdal iyo Sallel).

Waxa sii xoogaysatay Xaalada Abaareed ee dalka la soo daristay bari iyo galbeedba, Wuxuuna Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Md. Cabdiraxman Maxamed Cabdilaahi (Cirro) u magacaabay Gudi xaaladaas abaareed.

Hadaba, Shir-gudoonka a iyo xubno Xildhibaano ka mid ah oo hogaaminayo **Gudoomiye Mudane Yaasiin Maxamuud** ayaa shir-saxaafadeed ay ku qabteen Golaha **19 November 2025** waxay ka Dareen celiyeen Xaalada Abaareed ee dalka ka jirta madaama Goluhu ka wakil yahay bulshada Somaliland, waxayna sheegeen inay garab taagan yihiin dadkooda abaartu saamaysay iyo xaalada adag ee ay ku sugan yihiin, isla markaana iyagoo ayidaya baaqii Madaxweynaha iyo Gudidda uu u magacaabay Xaalada Abaaraha, waxay Gole ahaan qaadhaanka gurmadka abaareed ku darsadeen lacag ah **750,000,000/= (Todoba boqol iyo kun milyan)**, taas oo hordhac u ah doorka uu Goluhu ka qaadanaho qaadhaanka gurmad abaaraha.

Gudoomiyaha Golaha oo ku hadlaya afka Golaha wuxuu Bulshada u soo jeediyay in la garab istaago bulshadooda ay la soo daristay xaalada adag ee abaaruhu, isla markaana loo baahan yahay in qofkasta wixii tamartiisa ah kaga qayb-qaato gurmad abaaraha.

## HOOLKA FADHIYADA GOLAHA OO DIB U HABAYN LAGU SAMEEYAY.

**24 November 2025** waxaa si rasmi ah loogu daah-furay Golaha Wakiillada dib-u-casriyeyn ballaadhan oo lagu sameeyey Qalabka Fadhiga ee Golaha, taas oo qayb ka ah dadaallada lagu xoojinayo hufnaanta shaqada Golaha Wakiillada, kor u qaadista tayada Fadhiyada iyo casriyeynta teknoolajiyadda fadhiyada guud ee Golaha.

Munaasibadda waxaa si wadajir ah Xadhiga uga jaray Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL, **Mudane Yaasiin Maxamuud Xiir (Fartoon) iyo** Madaxa Xafiiska NIMD ee Somaliland/Somalia, Mudane Cabdijalil Dahire, waxaana sidoo kale Gudoomiyaha ku weheliyay Guddoomiye kuxigeenka 1aad **Md. Siciid Mire Faarax (Giire) iyo** Madaxa Midawga Yururb (EU Ambassador) **Francesca Di Mauro.**






Dib-u-casriyeyntan ayaa ku timid iskaashiga Ballaaran ee u dhexeeya Golaha Wakiillada, Hay'adda NIMD iyo Midowga Yurub, waxaana hoolka Fadhiyada Golaha lagu xidhay qalab kucasriya oo ku saabsan:-

• Tayada maqalka iyo muuqaalka kulamada (Audio-visual system of the chamber)

• Hufnaanta diiwaangelinta fadhiyada

• Fududeynta habsami u socodka doodaha iyo go'aan-qaadashada


Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Mudane Yaasiin Maxamuud Xiir (Fartoon) ayaa uga mahadceliyey Hay'adda NIMD iyo Midowga Yurub taageerada ay u muujiyeen casriyeynta shaqada Golaha, isagoo xusay in qalabkan cusub uu si weyn u yareynayo caqabadihii farsamo ee hore uga jiray kulamada Fadhiyada Golaha.

## Hay'adda Max Plank Foundation oo Golaha Buugaag ku wareejisay

**19 August 2025** Shir-gudoonka Golaha Wakiilada oo uu Hogaaminayo Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon) kuna weheliyo Gudoomiye Xigeenka 1aad Md. Siciid Mire Faarax (Giire) ayaa Hay'adda Max Planck Foundation kala wareegay Buugag iyo Agab Sharci

Hay'adda Max Planck Foundation ayaa ku wareejisay Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland buugag iyo qoraallo muhiim ah oo dhinaca sharci-dejinta ah. Agabkan ayaa lagu tilmaamay inuu wax weyn ka tari doono kor u qaadista tayada Xeer-dejinta iyo habraaca Baarlamaanka.






Agabkan oo ka koobnaa:,

1. Buug-yaraha Habraaca Xeer-qorista ee Somaliland (LegislativeDrafting and Process Manual).
2. Buugga Eray-bixinta Sharciga ee Somaliland.
3. Shan Majaladood oo Xeerar ah (2002–2024).
4. Qoraalka (Draft) Xeerka Habraaca Xeer-dejinta

Sidoo kale, waxa ay hore Hay'addu ku wareejisay Golaha buugaag sharci ah oo loogu talo galay Maktabadda Baarlamaanka, kaas oo ay ku urursan yihiin shuruucdii ugu dambeeyey ee dalka.

## XAFIISKA LA-TALINTA ARRIMAHA HAWEENKA OO LA DAAH-FURAY

Xafiiska La-Talinta Arimaha Haweenka (GAO) ee Golaha Wakiilada SJL wuxuu gacan ka siiya Golaha Wakiillada (HoR) hoggaaminta istaraatiijiga ah ee sinnaanta muwaadiniinta. Tani waxay ka mid tahay dhisidda iyo xoojinta Gudida Haweenka Baarlamaanka Somaliland (Somaliland Women Parliamentary Caucus), horumarinta sinnaanta muwaadiniinta, iyo is-waafajinta aragtida xaquuqaha muwaadiniinta ee dhammaan hannaanka sharci-dejinta.





Ujeedada Xafiiskan loo sameeyay aha:-

- In la taageero Gudida Haweenka (Women Caucus) ee Golaha Wakiillada si uu u guto waajibaadkiisa ugana midho-dhaliyo himilooyinkiisa.
- In la horumariyo sinnaanta muwaadiniinta lana xoojiyo u-doodista xuquuqda haweenka ee Golaha Wakiilada Somaliland.
- In nidaamka sharci-dejinta lagu daro aragti haweenka iyo horumarinta sinnaanta muwaadiniinta.
- In lala falgalo daneeyayaasha si loo xoojiyo dadaallada ku saabsan joogteynta horumarinta haweenka (gender mainstreaming).



Hadaba, **21 Sebtembar 2025** ayaa kulan si heer sare ah loosoo agaasimay lagu qabtay Damal Hotel. Waxaa kulankaa 'Daah-Furka' Xafiiska kasoo qaybgalay in ka badan 200 oo qof oo ka kala socda Golaha Wakiilada, Golaha Guurtida, Golaha Wasiirada Xukuumada, Safaaradaha caalamka ee Hargaysa ku sugan, Xafiiska EU-da, Hay'adaha caalamiga ah sida UN-ta iyo INGOs, Hay'adaha maxaliga ah iyo ururada arimaha bulshada, saxaafada, iyo haweenka isu diyaarinaaya inay u tartamaan doorashooyinka mustaqbalka.

## AQOON-KORODHSIYADII IYO TABABARADII

- **Aqoon is-waydaarsi ku saaban Hababka Wax ka badelka iyo Kaabista Dastuurka.**

**06 August 2025** ayay **Hay'adda Max Planck** magaalada Hargeysa ku qabatay aqoon-isweydaarsi laba maalmood soconaya oo loo qabtay xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Somaliland, Aqoon-isweydaarsigan oo diiradda saaray fahamka hababka wax-ka-bedelka iyo kaabista dastuurka, iyada oo la isku dayayo in loo dhowaado heerarka dimoqraadiyadeed iyo hab-dhaqameedyada caalamiga ah ee arrimaha dastuurka.

Intii uu socday aqoon-isweydaarsigu, waxa la falanqeeyey sida Somaliland ula jaanqaadi karto waddamada kale ee leh nidaamyo la mid ah kan Somaaliland, iyadoo si gaar ah loo darsayo hab-raacyada ay waddamadan u maraan dib-u-eegista dastuurkooda, waxaana la isbarbar dhigayay xaaladooda siyaasadeed iyo ta Somaliland.

Sidoo kale, waxa lagu falanqeeyey doorka bulshada rayidka ah, hay'adaha garsoorka iyo sida loo maareeyo kala duwanaanshaha aragtiyeed marka la eego wax-ka-bedelka dastuurka. Waxa si weyn loo adkeeyey muhiimadda ay leedahay in la tixgeliyo duruufaha gudaha marka isbeddel lagu samaynayo dastuurka.

- **Tababar iyo Aqoon korodhsi loo oqabtay Xildhibaanada iyo Shaqaalaha**

**26-27 October 2025**. Waxa Tababar iyo aqoon korodhsi ku saabsan shaqada Baarlamaanka loo qabtay qaar ka mid ah Xildhibaanada iyo Shaqaalaha Golaha, Tababarkaas ayaa lagu baranayey isla xisaabtanka iyo korjoogtaynta Baarlamaanka ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Somaliland, iyadoo lagu falanqeeyey mowduucyada kala ah:

- Miisaaniyadda Qaranka iyo Maamulkeeda – Fahamka habka loo diyaariyo, loo ansixiyo, loona kormeero miisaaniyadda si loo hubiyo in si hufan loo isticmaalo.
- Habraacyada Xisaabaadka iyo Kormeerka (Auditing) – Barashada nidaamyada lagu hubiyo saxnaanta iyo hufnaanta maaliyadeed, iyo ka hortagga khaladaadka iyo musuqmaasuqa.

- Kalfadhiyada Tijaabada ah (Mock Sessions) – Matalaad dhab ah oo ku saabsan doodaha Baarlamaanka, cod-bixinta iyo kormeerka miisaaniyadda si loo helo waayo-aragnimo sugan.

## MAALINTA LA-KULANKA DADWAYNAHA EE GOLAHA WAKIILLADA

Golaha Wakiilladu wuxuu leeyahay Maalmo Kulamo dadweynaha (Public Open Day) u furan Dadweynaha gaar ahaan Dhalinyarada Ardayda ah ee Jecel inay bartaan Siyaasada, Shuruucda iyo arrimaha shaqo ee Hay'addaha Dawlada. Hadaba intii ka dambeysay Kal-fadhigii 12aad waxa Golaha soo booqday Arday kala duwan oo ka kala socday Dugsiyo dhawr ah kuwaas oo kala ahaa:-

- **29 October 2025** Ardayda ka socotay Dugsiga Abaarso gaar ahaan qaybta Hablaha ayaa booqasho Golaha ku yimi, booqashadaas oo qayb ka ah barnaamijka wacyigelinta iyo aqoon-kororsiga ee ay iskuullada iyo jaamacadaha dalka ku yimaadaan Golaha, si ay u helaan faham qoto dheer oo ku saabsan habka shaqada hay'adaha xeer-dejinta, gaar ahaan Golaha Wakiillada.





- **26 October 2025** waxa booqasho wax-barasho ku yimid Golaha arday ka kala socday Jaamacadaha Magaalada Bebera ee Gobolka Saaxil, Jaamacadahaas oo kala ahaa Jaamacadda Badda, Jaamacadda Golis, Jaamacadda Alpha, iyo Jaamacadda Abaarso ee magaalada Berbera.






Booqashadan ayaa qayb ka ahayd barnaamij wacyigelin iyo aqoon-kororsi oo uu soo qabanqaabiyey Ururka Dhalinyarada ee Youth Development and Educational Volunteer, kaas oo ujeeddadiisu tahay in dhalinyarada iyo ardayda jaamacaduhu helaan fahan buuxa oo ku saabsan habka shaqo ee hay'adaha dawladda, gaar ahaan Golaha Wakiillada

- **01 October 2025** Waxa Golaha Soo booqday Arday ka socotay Iskuula Pharo Foundaton.
- **02 October 2025** sidoo kale waxa Golaha soo booqday Arday ka socotay Iksuulka SOS.


Booqashooyinka iyo qaabilaada Golaha Wakiilladu u sameeyay Dhalinyarada kala duwan ee Ardayda Jaamacadaha iy Dugsiyada ka kala socday waxa hormood ka ahaa Maamulka Golaha oo u fududeeya ardaydaas sidii ay Golaha iyo siduu u shaqeeyo wax uga ogaan lahaayeen waxaana soo dhawaynta ardaydaas ka qayb-qaatay Xildhibaanada Golaha xubno ka mid ah oo ardayda u sharaxay shaqada Golaha ardayduna wax ka waydiiyeen wixii su'aalo ah oo jeclaayeen inay wax ka ogaadaan. Sidoo kale Maamulka oo ugu horeeyo Xoghayaha Guud ee Golaha iyo Agaasimayaasha Waaxyuhu waxay Ardayda soo mariyaan qaybaha Golaha sida Laybareeriga iyo Hoolka Shirarka.

## SAFARADII DIBADA LOO BAXAY

- **Waftigii Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad hogaaminaya ee Dalka Kenya**

**18 November 2025** Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)** oo ay weheliyaan xildhibaano ka tirsan Golaha Wakiillada ayaa safar shaqo ku tagay Dalka Kenya Magaalo Madaxdiisa Nairobi.

Waftigan Gudoomiye ku-xigeenka 1aad hogaaminayo intii joogeen Magaalada Nairobi waxay booqasho ku tageen Safaarada Somaliland ee Dalka Kenya, waxaana waftiga si diiran u soo dhaweeyay Safiirka iyo Safiir-ku-xigeenka Jamhuuriyadda Somaliland ee dalka Kenya.



Mas'uuliyiinta safaaraddu waxay Guddoomiye Ku-xigeenka iyo xildhibaanada ka siiyeen warbixin ku saabsan hawlaha safaaraddu u hayso Qaranka iyo muwaadiniinta Somaliland ee dalka Kenya.

Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ayaa u mahadnaqay masuuliyiinta safaaradda soo dhaweynta qiimaha leh ee ay u sameeyeen waftiga, wuxuuna ku dhiirri-geliyay safaaradda

inay sii xoojiso shaqada muhiimka ah ee ay qaranka u hayaan, isla markaana ay kor u sii qaadaan adeegyada ay u fidiyaan muwaadiniinta Somaliland.

- Waftigii Xildhibaanada iyo Masuuliyiin kale oo Dawladu ku tageen Dalka Ghana

**12 October 2025** Wafti ballaadhan oo ka socda Jamhuuriyadda Somaliland, kana kooban xubno ka tirsan Golaha Wakiillada gaar ahaan Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada iyo Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka oo ay weheliyaan Xoghayaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Miisaaniyada iyo Dhaqaalaha, Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka, iyo Guddoomiyaha Guddida Maamul-wanaagga Qaranka ayaa safar shaqo ku jooga dalka Ghana.



waftiga oo muddo shan cisho ah ku sugnaa dalkaas ayaa ugu horeyn kulan muhiim ah la yeeshay Boqorka Caasimadda Ghana, Boqor Tackie Teiko Tsuru II, kaas oo si diirran ugu soo dhaweeyey hadhimo sharafeed gaar ah. Intii ay kulanka ku guda jireen, waxa laga wada hadlay xoojinta xidhiidhka saaxiibtinimo iyo iskaashiga labada dal ee dhinacyada maamulka, daahfurnaanta, iyo kobcinta hab-maamul wanaagga.

Sidoo kale, waftigu waxa ay booqasho sharaf ku tageen Sheekh Prof. Osman Nuhu Sharubutu, oo ah Shiikha Guud ee Culimada Islaamka ee dalka Ghana, halkaas oo ay kaga wada hadleen doorka diintu ku leedahay horumarinta wada noolaanshaha iyo nabadda bulshada.




Marka laga yimaado labadaas kulan ee hore, waftigu waxay dhinaca Dawlada kulamo muhiim ah la yeesheen Guddoomiyaha Baarlamaanka Ghana, Xoghayaha Guud, iyo Guddiyo kala duwan oo ka tirsan Baarlamaanka Ghana, kuwaas oo ay kala yeesheen xog-is-weydaarsi ku saabsan maaraynta miisaaniyadda, dabagalka iyo ilaalinta hantida qaranka, maamulka hufan, iyo horumarinta nidaamyada baarlamaanka.

Sidoo kale, xubnaha waftiga ayaa ka qaybgalay tababar ay soo agaasimeen Machadka Tababarrada Baarlamaanka Ghana (Parliamentary Training Institute), kaas oo lagu kobcinayey aqoonta iyo xirfadaha la xidhiidha hawlaha xeer-dejinta iyo isla xisaabta iyo korjoogtanta baarlamaanka ee laama Dawlada.






Ugu dambayn, waftigu waxay shahaado sharaf ku maamuuseen Baarlamaanka iyo Machadka Tababarrada Baarlamaanka Ghana, iyagoo uga mahadceliyey soo dhawaynta, iskaashiga iyo kaalintooda firfircoon ee ay ku taageerayaan xoojinta xiriirka iyo wada-shaqaynta labada gole baarlamaan ee Somaliland iyo Ghana.

## ➢ Waftigii Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Xildhbaanada ee Dalalka Yurub.

**08 iilaa 17 September 2025** Waftigii Xildhibaano ah ka socday Golaha Wakiillada oo uu hoggaaminayay Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha **Md. Cali Xaamud Jibriil** oo ay waheliyaan Xildhibaanada kala ah Md. Barkahd Jaamac Batuun, Md. Xuseen Aadan Cade iyo Md. Xasan Axmad Cilmi (Xasan Kayse) ayaa si diiran loogu soo dhaweeyay dalal ka mid ah Yurub sida Dalka Finland, Sweden, Beljium iyo Germany

Wafdigan oo booqday qaar ka mid ah dalalka Qaaradda Yurub, si ay qadiyada Somaliland u gaadhsiiyaan qadiyada Somaliland, waxay ugu horeyn Booqdeen **Dalka Finland** waxayna halkaan kula kulmeen Gudidda Arrimaha Dibada ee Baarlamaanka Finland, Wasaarada Arrimaha DIbada iyo Hay'addo Caalami ah, waxayna ka wadahadleen Somaliland mudda ay jirtay, dawladnimada, dimuqraadiyada, doorashooyinka iyo xasiloonida ay mandaqada ku soo kordhisay, isla markaan Somaliand gaadhay heer ay maanta u qalanto inay aqoonsi buuxa ka hesho Dalalka Caalamaka gaar ahaan dalalka Yurub oo Finland ka mid tahay.

## ➢ Waftigii Gudoomiye Ku-xigeenka 2aad iyo Xildhbaanada ee Dalalka Yurub.

**08 iilaa 17 September 2025** Waftigii Xildhibaano ah ka socday Golaha Wakiillada oo uu hoggaaminayay Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha **Md. Cali Xaamud Jibriil** oo ay waheliyaan Xildhibaanada kala ah Md. Barkahd Jaamac Batuun, Md. Xuseen Aadan Cade iyo Md. Xasan Axmad Cilmi (Xasan Kayse) ayaa si diiran loogu soo dhaweeyay dalal ka mid ah Yurub sida Dalka Finland, Sweden, Beljium iyo Germany

Wafdigan oo booqday qaar ka mid ah dalalka Qaaradda Yurub, si ay qadiyada Somaliland u gaadhsiiyaan qadiyada Somaliland, waxay ugu horeyn Booqdeen **Dalka Finland** waxayna halkaan kula kulmeen Gudidda Arrimaha Dibada ee Baarlamaanka Finland, Wasaarada Arrimaha DIbada iyo Hay'addo Caalami ah, waxayna ka wadahadleen Somaliland mudda ay jirtay, dawladnimada, dimuqraadiyada, doorashooyinka iyo xasiloonida ay mandaqada ku soo kordhisay, isla markaan Somaliand gaadhay heer ay maanta u qalanto inay aqoonsi buuxa ka hesho Dalalka Caalamaka gaar ahaan dalalka Yurub oo Finland ka mid tahay.



**Dalka Germany** oo isagana ay booqdeen waftigu waxay Golayaasha dhigooda ah u gudbiyeen bayaankii iyo baaqii ay Golewaynaha ka qaaddeen kaas oo ah in Xukuumada lagu daynn dedaalada Ictiraaf raadinta ee ay waddo, badelkeedana Golaha Wakiilladu door muhiima ka qaato madaadama uu shacabka ka wakil yahay. Waxa ugu xiday Dalka Sweden waxayna la kulmeen Baarlamaanka Dalka Sweden iyo Gudiyadiisa, Maayarka Caasimada Sweden ee Stockholm iyo maayar ku-xigeenkeeda oo iyaga ay qadiyada Somalilad si mug leh u gaadhsiiyeen.

Waftigu safarkooda Qaarada Yurub waxay ku soo gabo-gabeeyeen **Dalka Beljium** Caasimadiisa Brussels, safarkaas Beljium waxa qayb wayn ka qaatay Safiirka Somaliland dalkaas u fadhiya **Ambassador Kayser**, waxayna la kulmeen intii ay dalkaas joogeen Baarlamaanka Midawga Yurub oo xaruntiisu Brussels tahay, gaar ahaan Gudidda Arrimaha Dibada ee Baarlamaanka Midawga Yururb oo ay warbixin dhinacyo badan taabanaysa oo ku saabsan qadiyada Somaliland u gudbiyeen. Waxa kale oo si gaar ah ula kulmeen intii ay ku sugnaayeen Magaalada Brussels Xildhibaanada Dalka Holland, Xildhibaanada Dalka Sweden, Xildhibaanada Dalka Talyaaniga iyo XIldhibaano dalalka kale xubno uga ah Baarlamaanka Midawga Yurub oo ay Iyana si gooni gooni ah ay qadiyada Somaliland uga warameen iyo baahida Somaliland u qabto inay caalamka ka hesho Aqoonsi buuxa madaama ay buuxisay shuruudihii looga baahnaa.



Waxyaabaha waftigu ay ka codsadeen Baarlamaanada, Hay'addaha iyo masuuliyiinta dalalkaas iyo sidoo kale Jaaliyadaha Somaliland ee ay la kulmeen ka mid ahaa:-

- I/n deeqaha iyo kaalmooyinka Dalalkaasi iyo guud ahaan Midawga yurub siiyaan Somaliland si toos ah loogu wareejiyo Somaliland, iyada oo aan loo marin dhinacyo kale, si kor loogu qaado hufnaanta iyo isla xisaabtanka taageerada iyo deeqaha ay ugu talo galeen Somaliland.

- in doorka jaaliyadda Somalilanda uu yahay mid muhiim ah oo laguna taageerayo qarannimada, horumarka iyo siyaasadda Somaliland.

- In Somaliland xaq u leedahay in la aqoonsado sida Falastiin loo aqoonsaday, isla markaana ay buuxiyeen dhamaan shuruudihii looga baahna si loo aqoonsado Somaliland.

- **Gudidda Arrimaha Bulshada oo Dalka Kenya Safar shaqo ku tagtay.**

**16 August 2025** Wafti ballaadhan oo ay hoggaaminayso Guddida Arrimaha Bulshada ee Golaha Wakiillada JSL, isla markaana ay qayb ka yihiin ururrada saxaafadda oo uu hormood ka yahay SOLJA iyo ururrada xuquuqul insaanka, ayaa safar shaqo ku tegay magaalada Nairobi ee Dalka Kenya. Ujeeddada safarka ayaa ahayd in waftigu xog-ogaal u noqdaan habka ay u shaqeeyaan warbaahinta madaxa-bannaan iyo kuwa dawliga ah ee Kenya iyo sidoo kale sida uu u shaqeeyo Komishinka Warbaahinta Kenya (Media Council of Kenya – MCK).

Intii uu socday safarku, waftiga ayaa kulammo muhiim ah la yeeshay hay'ado waaweyn oo ay ka mid yihiin Baarlamaanka Dalka Kenya, Media Council of Kenya, Kenya Broadcasting Corporation (KBC), iyo Royal Media Services (RMS), halkaas oo ay ka dhegeysteen warbixinno ku saabsan nidaamka saxaafadda, ilaalinta madaxbannaanida tifaftirka, iyo xidhiidhka warbaahinta iyo dowladda.




Kulamadan iyo booqashooyinkan ayaa qayb ka ah dadaallada lagu dardar-gelinayo Xeerka Saxaafadda Somaliland ee hadda horyaalla Golaha Wakiillada. Waftigu sidoo kale waxay booqdeen Safaaradda Somaliland ee Kenya, halkaas oo ay kula kulmeen madaxda safaaradda, iyaga oo uga mahadnaqay taageerada iyo soo dhoweynta ay ku heleen muddadii ay ku sugnaayeen dalka

- **Waftigii Golaha ee Shirka CHEA-AR oo Dalka Chana ka dhacay**

**11-15 August 2025** Magaalo-madaxda dalka Ghana ee Accra waxaa si rasmi ah uga furmay Shirka Ururka tifaftirayaasha Hadal-qoraalayaasha Dalalka Barwaaqo sooranka ee Afkira (CHEA-AR) oo shirwaynihiisii laba sannabo mar dhici jiray ku qabsaday Magaalada Accra ee dalka Ghana intii u dhaxaysay 11-15 August 2025, waxaana ka qaybgalay shirkaas 15 waddan oo xubno ka ah Ururka Barwaaqo-sooranka (Commonwealth Parliamentary Association – Africa Region.



Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland ayaa ka mid noqotay ka-qaybgalayaasha shirka, waxaana Waftiga Golaha  hoggaaminaya Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada, Mudane Cabdiraaq Siciid Ayaanle. Waftiga Somaliland waxaa ku wehelinayay Xoghayaha; Cawad Cali Maxamed – Agaasimaha Hadal-qoraalka, Cabdinaasir Cismaan Maxamuud – Agaasimaha Qorshaynta iyo Xamse Maxamuud X. Muuse – Agaasimaha Xafiiska Miisaaniyadda.







Ka-qaybgalka Somaliland ee shirkan ayaa ahayd tallaabo muhiim ah oo dhanka diblomaasiyadda baarlamaanka ah, taas oo kor u qaadaysa muuqaalka iyo doorka Somaliland ku leedahay madalaha caalamiga ah ee Xeer-dejinta. Waxa kale oo ay fursad u tahay in lagu xoojiyo xidhiidhada iyo iskaashiga mustaqbalka ee baarlamaanada xubnaha ka ah ururkan taariikhiga ah, kaas oo ay ku mideysan yihiin dalalkii hore ee uu Ingiriisku gumaysan jiray.

## KULAMO WUFUUDAHA IYO MADAXDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH

- **Wafti ka socday Hay'adda NIMD**

**28 October 2025** waxa Golaha soo booqday wafti ballaadhan oo uu hoggaaminayay Agaasimaha Guud ee Hay'adda **Netherlands Institute for Multiparty Democracy (NIMD),** waxaana Waftigaan soo qaabilay Golahana ku soo dhoweeyay Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ahna Ku-simaha Guddoomiyaha Golaha, **Md. Siciid Mire Faarax (Giire).**

Waftigan ayaa booqasho ku yimid Golaha Wakiillada iyagoo qayb ka ahaa barnaamijka Dawlad-kaab (Governance Support Programme) oo uu maalgeliyo Midowga Yurub (European Union), oo ay fulinaysay Hay'adda NIMD. Barnaamijkan ayaa diiradda lagu saarayo xoojinta awoodda iyo aqoonta Golaha Wakiillada ee ku aaddan isla xisaabtanka, hufnaanta iyo kormeerka shaqada Xukuumadda.



Gudoomiyaha ayaa uga mahadceliyey waftiga NIMD iyo Ururka Mzalendo taageerada ay siiyaan Golaha, isaga oo xusay in tababarada iyo aqoon-isweydaarsiyadu ay muhiim u yihiin kor u qaadista xirfadda shaqaalaha iyo fahamka xildhibaannada ee habraacyada Baarlamaaniga ah.

➢ **Waftigii ka socda Baarlamaanka Swedan oo Golaha yimi.**

**6 October 2025** Golaha Wakiillada Jamhuuriyadda Somaliland ayaa Golaha si diirran ugu soo dhaweeyay wafdi balaadhan oo ka socda dalka Sweden.

Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada, ahna Ku-Simaha Guddoomiyaha, **Mudane Siciid Mire Faarax (Giire),** ayaa xafiiskiisa ku qaabilay wafdiga xildhibaanada ah ee ka socda Baarlamaanka Sweden.

Wafdigan oo uu hoggaaminayay Safiirka Somaliland u fadhiya dalka Sweden, **Md. Sakariye Xasan Wacays**, waxa ka mid ahaa xildhibaanno heer sare ah oo ka socda Baarlamaanka Sweden.

Intii uu socday kulanka, labada dhinac waxa ay ka wada hadleen:

- Taariikhda jamhuuriyadda Somaliland iyo tan Golaha Wakiillada Jsl
- Xoojinta xidhiidhka labada dal iyo labada gole Xeer-dejineed.
- Doorka Baarlamaanka Somaliland ee dhismaha dimuqraadiyadda.
- Fursadaha iskaashiga mustaqbalka, gaar ahaan dhinacyada dimuqraadiyadda, maamulka iyo horumarinta bulshada labada dal.




Mudane Siciid Mire Faarax (Giire) ayaa sheegay: "Booqashadan waxa ay sharaf weyn u tahay Golaha Wakiillada Somaliland. Waxa aanu aaminsannahay in xidhiidhka Somaliland iyo Sweden uu yahay mid taariikhi ah oo mudan in si joogto ah loo xoojiyo."

Dhinaca kale, xildhibaanada reer Sweden ayaa uga mahadceliyay soo dhoweynta diirran ee loo sameeyay, iyaga oo tilmaamay: "Waxaan si weyn ula dhacay horumarka la taaban karo ee aan ku aragnay Somaliland, inkasta oo aanu dalka weli haysan aqoonsi caalami ah. Waxaan ballan qaadaynaa inaan bulshada iyo Baarlamaanka Sweden uga warrami doonnaan wixii aan indhahooga ku arkeen."

## ➢ Waftigii Maayarka Magaalada Sheffield ee Dalka Ingiriiska

**24 September 2025** Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)**, ayaa Golaha si diirran ugu soo dhaweeyay Maayarka Magaalada Sheffield ee dalka Ingiriiska, **Marwo Safiya Siciid Barbaraawi,** oo booqasho ku timid Somaliland, isla markaana booqasho rasmi ah ku timid Baarlamaanka Jamhuuriyadda Somaliland (oo ka kooban Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida).

Kulankan soo dhaweynta ah ayaa lagaga wada hadlay arrimaha ictiraafka caalamiga ah, wadashaqeynta dhinaca amniga, horumarinta adeegyada dab-demiska Somaliland, xoojinta xidhiidhka taariikhiga ah ee u dhexeeya Magaalada Sheffield iyo Somaliland, iyo sidii loo sii ballaadhin lahaa iskaashiga dhinacyada horumarinta bulshada iyo xidhiidhka laba geesoodka ah.

Guddoomiye Giire oo halkaasi ka hadlay ayaa iftiimiyay taariikhda Golaha Wakiillada iyo kaalinta uu ku leeyahay dhismaha dawladnimada Somaliland. Wuxuu tilmaamay in Somaliland uu yahay dalkii ay asal ahaan ka soo jeeday Marwo Safiya, isla markaana ay ku soo dhaweynayaan magaca Golaha Baarlamaanka Somaliland oo ka kooban labada gole ee Wakiillada iyo Guurtida. Wuxuu intaa ku daray in safarka Maayarku uu yahay mid xoojinaya xidhiidhka iyo isku xidhka bulshada labada dhinac.





Dhankeeda, Maayarka Magaalada Sheffield, Marwo Safiya Siciid Barbaraawi, ayaa uga mahadcelisay Guddoomiye Giire iyo Golaha Baarlamaanka sida diirran ee loogu soo dhaweeyay. Waxay xustay xidhiidhka qoto dheer ee bulsho ahaan iyo taariikh ahaanba u dhexeeya Magaalada Sheffield iyo Jamhuuriyadda Somaliland, iyadoo ballan-qaaday inay ka shaqeyn doonto sidii xidhiidhkaas loogu rogi lahaa fursado dhab ah oo horumarineed.

Sidoo kale, wafdiga uu hoggaaminaysay Maayarka Sheffield ayaa booqasho ku tegay Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland, halkaas oo uu ku qaabilay Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Md. Saleebaan Maxamuud Aadan. Maayarka Sheffield ayaa uga

mahadcelisay Guddoomiyaha Golaha Guurtida soo dhaweynta qaaliga ah ee uu u sameeyay, waxayna sheegtay inay sii xoojin doonto wada shaqaynta Golaha Guurtida iyo guud ahaan Baarlamaanka Somaliland.

**KAL-FADHIGA $12^{AAD}$ EE GOLAHA WAKIILLADA.** **28/07/2025**

1. Warbixinta Shir-guddoonka Golaha Wakiillada.
2. Warbixinaha Guddiyda Golaha
3. Dood Xaalada Abaaraha
4. Dooda Xaalada Guud ee Dalka
5. Ansixinta Maasuuliyinta Qaranka
6. Xeerarka Ka soo noqoda Golayaasha (Golaha Guurtida iyo Golaha Xukumada)
7. Mashaariicaha Sharci ee Golaha horyaala.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada uu marayo | Cidda Gacanta ku haysa |
|---|---|---|---|
| 1. | Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Xukuumada | Dood | Gole Waynaha |
| 2. | Wax ka -bedelka iyo kaabista Xeerka Saxaafada | Akhriska $1^{aad}$ | Guddida Arrimaha Bulshada |
| 3. | Xeerka Amniga Tiknoolajiyadda iyo Dembiyadda Tiknoolajiyada casriga (Cybersecurity &Cybercrime Act) | Dood | Gole Waynaha |
| 4. | Xeerka Dakhliga Guud iyo Cashuuraha Xeer. Lr. 72/2022 | Codayn 2/3 | Gole Waynaha |
| 5. | Xisaab-Xidhka 2023 | Dood | Gole Waynaha |
| 6. | Wax-kabedelka Xeerka Maamulka Maaliyada Dawladda -**Xeer.Lr. 75/2021.** | Dood | Gole Waynaha |
| 7. | Xeerka Dakhliga Shidaalka | Codayn | Gole Waynaha |
| 8. | Xeerka Rahanka Hantida ma Guurtada ah | Dood (Akhriska $2^{aad}$) | Gole Waynaha |
| 9. | Xeerka Ciqaabta Guud | Akhriska $1^{aad}$ | Guddida Shurucda |

8. Iyo Wixii kale ee soo kordha.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**